

## Iminka waxaa la gaaray waqtigi iskool la codsan lahaa xilli dugsiyeedka deyrta 2026

This information is available in English, Somali and Arabic. Go to [www.norrkoping.se/skolval](http://www.norrkoping.se/skolval) to read the information in these languages.

Adigaaga leh canug **fasalka dugsiga xannaannada billaabi doona xilli dugsiyeedka deyrta ee 2026** waa in aad iskool canuggaaga u codsataa. Waxaad iskool ka codsan kartaa fasal dugsi xannaano oo degmo iyo mid gaar loo leeyahay labadaba, waana muhiim in aad adigu ka waalid ahaan dugsi doorasho sameysid.

### Codsigaaga iskoolka waxaad soo gudbineysaa inta u dhexeysa 9 Jannaayo iyo 25 Jannaayo

Waxaad codsigaaga ku aaddan iskoolka ku soo gudbineysaa adeegga elekteroonigga ah ee iskool doorashada. Isku xiraha adeegga elekteroonigga ah wuxuu ku jirayaa [www.norrkoping.se/skolval](http://www.norrkoping.se/skolval). Inta u dhexeysaa 9 Jannaayo ilaa iyo 25 Jannaayo 2026 ayaad adeegga elekteroonigga ah ku geleysaa oo aad ku soo gudbineysaa rabitaankaaga ku aaddan iskoolka. Waxaad codsan kartaa inta iskool ee aad doontid. Codso, sida aad u kala jeceshihidna u kala hor-hormar iskoollada aad is leedihid waa in uu canuggaagu dhigto. Marka aad ku gashid adeegga elekteroonigga ah waxaad codsiga ku saxiixaysaa adeeg elekteroonig ah, tusaale ahaan Bank-ID-ga taleefanka gacanta. Labada waalid waa in ay isla saxiixaan si uu codsigu u shaqeeyo.

### Haddii aad rabtid in aad iskool xor ah boos ka codsatid

Adigaaga daneynaya dugsi gaar loo leeyahay waxaad u baahantahay in aad dugsigaas toos u codsatid, codsigaaga **na** xitaa ku gudbisid adeegga elekteroonigga ah ee iskool-doorashada. Waa muhiim in aad labadaas tallaab qaaddid si aad boos u heshid. La xiriir dugsiga ay arrintu khuseyso si aad u ogaato sharciyada ay u leeyihiin meelaynta.

### Xeerarka ku aaddan cidda boos heleysa

Haddii aad codsatay iskool degmadu leedahay waxaan ka duuleynaa codsigaaga intii suurta gal ah. Haddii aan boos loo hayn dhammaan kuwa codsaday waxaa la adeegsanayaa xeerka u soo kala horreynta si go'aan looga gaaro cidda booska heleysa. Masaafada u dhexeysa cinwaanka uu canuggu ku qoranyahay ilaa iyo iskoolka uu dalbaday micno weyn ayey u leedahay fursadda ku aaddan in uu canuggu boos helo. Wixii dheeraad ah ka akhriso [www.norrkoping.se/skolval](http://www.norrkoping.se/skolval).

Haddii aadan sameyn doorasho iskool wuxuu canuggaagu boos ka helayaa mid ka mid ah iskoollada boosku ka bannaanyahay ee masaafo macquul ah guriga u jira.

## **Jawaab ku aaddan iskool ku meeleyntu waxay imaanaysaa bartamaha Maarso 2026**

Maarso gudeheeda ayaad heleysaa jawaab ku aaddan iskoolka uu canuggaagu booska ka helay. Jawaabta waxaa lagu dhex faafinayaa adeegga elekteroonigga ah ee loogu tala galay iskool doorashada, waxayna, marka ay kuu taallo jawaab ay tahay in aad akhrisatid, fariini kuugu imaanaysaa taleefanka gacanta ama e-mailka. Gal adeegga elekteroonigga ah si aad u heshid jawaabta.

### **Gaadiid iskool**

Gaadiidka iskoolku waxa uu aadaa dugsiyada qaarkood, waxa loogu yeero iskoollada gaadiidka lagu geeyo. Haddii aanu jirin dugsi masaafo macquul ah u jira guriga, waxay ilmuhu heli karaan gaadiid u qaada iskoolkooda gaadiidka lagu tago. Waxaad adeegga elekteroonigga ah ka arki kartaa hadduu canuggaagu leeyahay iskool leesu qaado iyo iskoolka uu kaasi yahay. Haddii aad rabto inaad hubiso inaad hesho iskool u qaadis, waa inaad codsataa iskool la isu qaado. Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan gaadiidka dugsiga waxaad ka heleysaa [norrkoping.se](http://norrkoping.se)

### **Ma qabtaa su'aalo ama ma u baahantahay caawimaad?**

Booqo [www.norrkoping.se/skolval](http://www.norrkoping.se/skolval) si aad u hesho macluumaad dheeraad ah, waxna uga heshid su'aalaha iyo jawaabaha. Halkan waxaa tusaale ahaan ku jira macluumaad ku aaddan iskoollada degmada iyo kuwa gaarka loo leeyahay ee Norrköping ka jira iyo xeerarka kala horhorreynta ee loogu tala galay iskool doorashada fasalka dugsiga xannaannada ee iskoollada degmada.

Waxaad sidoo kale Xarunta Norrköping degmada kala xiriiri kartaa taleefan nambarka 011-15 00 00. Waxaa sidoo kale Xarunta Norrköping lagu booqan karaa Trädgårdsgatan 21 i Norrköping.

Waad ku mahadsantahay in aad soo gudbisay codsigaaga ku aadan iskoolka!

Salaan diiran

Xafiiska waxbarashada, degmada Norrköping